

Barnaamijyada ayaa ka jira magaalada oo idil. Waalidka ayaa goob dalban kara, laakiin go'aanka kama dambaysta ah ayaa ku salaysan cinwaanka guriga ama daryeelka carruurta, sida meel iyo khadka gaadiidka loogu heli karo.

Haddii aad doonayso inaad dalbato High Five waa inaad buuxiso Kaadhka codsiga dugsig.

Si aad u codsato kaadhka dalabka ama macluumaadka diiwaan gelinta High Five, fadlan kala xiriir:

STUDENT PLACEMENT SERVICES CENTER

2410 Girard Ave. N.
Minneapolis, MN 55411

Qoysaska afkooda hooyo aanu Ingiriisiga ahayn, fadlan la xiriira:

NEW FAMILIES CENTER

3345 Chicago Ave. S.
Minneapolis, MN 55407
612.668.3700

Español/Spanish
612.668.3702

Hmoob/Hmong
612.668.1836

Soomaali/Somali
612.668.3704

Khidmadda barnaamijka High Five dakhliga ku salaysan

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa gobolku uga baahan yahay inay u sameeyaan khidmad ku salaysan dakhliga qoyska ardayga High Five ah. Khidmadda ayaa abuuraysa cadadka khidmadda adeegga lagu bixinayo kuna salaysan cadadka qoyska iyo dakhliga qoyska.

- Khidmadda High Five ayaa laga saamaxay carruurta u qalma cuntada bilaashka ah ama sicirkeeda la jabiyey ama ilmaha u qalma adeegyada waxbarashada gaarka ah.
- Qoysaska aan u qalmin cuntada bilaashka ah ama sicirkeeda la jabiyey ayaa ku qaan baxaya khidmad hadba inta dahligoodu le'eg yahay. Cunugna looga saari mayo inaan qoyskiisu khidmadda bixin karin.

Nofeembar 2011



WAXBARASHADA AMMINKA HORE (Preschool)



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.



High Five is waa barnaamij waxbarashada dugsiga ka hor ee ilmaha:

- Afar jirsaday ka hor Setembar 1
- Bilaabi doona kindergarten dayrta xigta

Mudnaanta ayaa la siinayaa carruurta u qalma cuntada bilaashka ah ama sicirkeeda la jabiyeey kuna nool Minneapolis.

High Five ayaa ka caawiya ilmuhu inay dugsiga u diyaar garoobaan

- Isagoo waxbarashada ka dhigaya maaweelo; cayaartu waa sida ilmihu ku shaqeeyaan.
- Iyagoo akhriska ku baranaya muusig, sheeko, dhaq dhaqaaq, saynis, xisaab iyo waxqabadyada culuunta bulshada.
- Madadaalo iyo firfircooni jirkooda, faraha, gacmaha, lugaha iyo cagaha.
- Baraya xirfadaha bulshada. Carruurta ayaa baranaya siday isu daryeelaan, shaqeeyan ula cayaaraan carruurta kale una raacaan hawl maalmeedka dugsiga.

Qoysaska ayaa ka caawin kara in ilmahoodu dugsiga u diyaarsan yihiin, kuna guulaystaan dugsiga...

- Iyagoo si joogto ah ula eegaya ilmaha buugaagta.
- Iyagoo ilmaha kala hadlaya nolosha & dugsiga.
- Iyagoo ilmaha su'aalo ka weydiinaya waxyaabaha ku wareegsan.
- Iyagoo siinaya qalin qori, warqad, isla markaasna ay ku feegaaraan.
- Iyagoo xadaynaya waqtiga ilmuhu daawadaan Telefishinka.
- Adigoo u riyaaqaya dadaalkooda koboca iyo waxbarashada.
- Iyagoo ilmahooda u diraya dugsiga maalin walba Hadii ayan xanuunsanayn.
- Iyagoo si joogto ah ula xiriiraya macallimiinta.

Waalidku waa carruurta macallinkooda koowaad uguna muhiimsan.

